NATIONWIDE CHILDREN'S®
*When your child needs a hospital, everything matters.*

**Helping Hand™** *Health Education for Patients and Families*

# Raajada Kumbuyuutarka Maskaxda (MRI)
# Magnetic Resonance Imaging (MRI) (Somali)

Sawirka Dhawaaqa Magnetic (MRI) waa hab lagu eegayo gudaha jirka. Mishiinka MRI waa birqoboto weyn oo dhinac kasta ka maraysa jidhka. Waxay isticmaashaa goobaha birqobotada iyo calaamadaha raadiyaha si ay u sameyso sawirro. Ilmahaaga uma beeyla noqon doono shucaac inta lagu jiro MRI-ka.

Magaca cunugga: ________________________ **TAARIIQDA BALANTA:** _______________

Fadlan ilmahaaga keen:

- ☐ Xarunta Guud ee Nationwide Children's Hospital, Dabaqa Kowaad, Aaga Crossroads Registration, 700 Children's Drive, Columbus, OH. | Telefoonka: (614) 722-2351, Dooqa 2.
- ☐ Nationwide Children's Hospital, Westerville U dhow Xarunta Guriga, Xafiiska Diiwaangelinta 433 N. Cleveland Ave., Westerville, OH. | Telefoonka: (614) 355-8300
- ☐ Nationwide Children's Hospital, Xarunta Galbeed, Xarunta Lafaha iyo Qalliinka ee Livingston, Xarunta Diiwaangelinta ee Qalliinka 405 Butterfly Gardens Drive, Columbus, OH. | Telefoonka: (614) 722-6200

Waalid ama mas'uul waa inuu la joogaa ilmuhu haddii uu ka yar yahay 18 sano inta lagu jiro diiwaangelinta.

**WAQTIGA IMAANSHAHA:**

- ☐ Haddii ilmuhu u **baahdo suuxdin**, waxaad heli doontaa wicitaan telefoon oo ka imanaya kalkaaliye maalin ka hor baaritaanka. Waxay kuu sheegayaan goorta iyo meesha aad imaaneyso, iyo goorta ilmuhu joojinayo cunista iyo cabbitaanka.
- ☐ Haddii canugaaga **uusan u baahneyn suuxdin, waxaan kaaga baahannahay inaad timaatido 30 illaa 45 daqiiqo ka hor** waqtigaaga iskaanka. Tani waxay saamixi doontaa in la diiwaangaliyo oo la buuxiyo waraaqaha baadhista amaanka leh.

Xiliga baaritaanka: ________________________

**Haddii aad u baahato inaad iskadhaafto ama dib u jadwaliso ballanta ilmahaaga, wac (614) 722-6200 oo dooro xulashada Raajada.**


©1986, La muraajaceeyay 2025, Nationwide Children's Hospital
Sii Socda…


## Maalinta MRI-ka

- Ilmahaagu wuxuu la imaani karaa qalab caruurta kuciyaaran uu jecel yahay ama buste si uu u haysto inta lagu jiro baaritaan. Qalabka caruurta kuciyaaran kuma lahaan karaan bir gudaha ama dusha sare. Birta waxay saameyn kartaa baaritaanka.
- **Dharka** - Ugu labis canugaaga dhar nifaas leh oo si fudud loogu saari karo. Si loo hubiyo badqabka, waxay iska baddali doonaan dharkooda oo waxay xiran doonaan goono ama surwaal isbitaal. Waa in la iska saaraa wax kasta oo bir kaleh gudaha ama dusha sare, sida biinka timaha lagu xirto, saacadaha, dahabka, iyo daloolaha jirka ee lagaliyo biraha. U sheeg qofka baaritaanka sameynaya (farsamo yaqaan) haddii ilmahaagu uu leeyahay shabad ama uu isticmaalayo balastar daawo ah.
- **Daawooyinka** – Maalinta baaritaanka MRI-da, **ha siin ilmahaaga daawo dejinaya ama hurdo galinayso.** Haddii aad su'aalo qabto, wac (614) 722-2624.
- **Daawooyinka dhakhtarku qoray** – Sii ilmahaaga daawooyinkooda ee dhakhtarku ku qoray.
- Haddii ilmahaagu isticmaalayo balastar daawo ah, ka saar balastarka ka hor baaritaanka. Ku dheji labada dhinac ee iskooda iskudheggan kadibna ku tuur musqusha. Haduu jiro jeel laga mariyay maqaarka, waa inaad katiritrtaa kahor intuusan galin MRI. Baaritaanka kadib, ilmahaaga ku dheji balastar cusub.

## Sida Loo Qabto Baaritaanka

Haddii ilmahaaga **aan la** suuxin, hal waalid ayaa la joogi kara inta lagu jiro MRI-ka.

Qabiirka raajada ama kalkaalisada ayaa idinka qaadeyso adiga iyo canugaaga qolka sugitaanka ee idin geyneyso aaga MRI.



**Sawirka 1** Mashiinka MRI

**Si loosugo badqabkaaga iyo kan ilmahaaga:**

- Ka saar dhammaan biraha iyo dahabka ka hor intaadan gelin aagga MRI-da. Waxaad heli doontaa armaajo aad ku riddo alaabtaada.
- Adiga iyo ilmuhu waxaad mari doontaan qalabka baarista biraha ka hor intaadan galin qolka MRI-da.
- Ilmahaaga wuxuu jiifi doonaa miiska MRI-da. Waxay u dhaqaaqeysaa si jirkooda uu ugu jiro gudaha mashiinka furitaanka (Sawirka 1). Haddii ilmuhu uusan suuxdin qaadanayn,

waa inuu si aad ah u dhaqaaq la’aan ahaado inta lagu jiro baaritaanka. Haddii ay aad u xarakoodaan, baaritaanka wuu dheeraan karaa ama dib ayaa loo jadwalin karaa. Haddii ilmuhu uusan awoodin inuu dhaqaaq la'aan ahaado, MRI-da waxaa dib loogu jadwalin karaa iyadoo la isticmaalayo suuxdin maalin kale,ama dhakhtarkaaga ayaa heli kara baaritaan kale oo uu joogi karo.

- Ilmahaaga wuxuu xiran doonaa dhagaha-xir ama madax-gashiga codka looga talagalay inta lagu jiro baaritaanka. Baaritaanku wuxuu u eg yahay garaacis ama garaacid cod dheer leh. Qabiirka raajada wuxuu kuu sheegi doonaa haddii ilmuhu daawan karo filim ama dhagaysan karo muusig inta lagu jiro baaritaanka.
- Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu u baahdo dareere kaabayaal inta lagu jiro baaritaanka si dhakhtarku ama bixiyaha daryeelka caafimaad u helo macluumaad dheeraad ah. Haddii ay sidaas tahay, irbad (IV) ayaa lagu duri doonaa xididkooda si dareeraha kaabayaashu ugu gudbo jirka.
- Khabiirka qalabka baaritaanka ayaa banaanka uga baxaaya qolka inta baaritaanku socdo laakiin wuxuu awoodaa inuu arko uuna maqlo codka cunugaaga. Baaritaanka MRI-ka ee ilmahaaga wuxuu qaadan karaa 20 ilaa 90 daqiiqo.

## Kadib Baaritaanka

- Haddii irbad (IV) la geliyay, waa la saari doonaa.
- Natiijooyinka MRI-ka waxaa loo diri doonaa dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka. Waxay kuu sharxi doonaan natiijooyinka.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, waydii dhaqtarka canugaaga ama khabiirka raajada, ama soo wac (614) 722-6200.